# FAAFINTA RASMIGA
# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 11aad Muqdisho 30 Dis. 1983 L. 3 r 12

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.


## KOOBNIIN

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI


SHARCI L. 21 ee 10 Disembar 1983, Ciqaabta Dembiga Been Abuurka Lacagta Dalka iyo Warqadaha leh Qiimaha Lacageed. BOG. 847


### QAYBTA LABAAD

### XEER


WASAARADDA MAALIYADDA L. 10 ee 6 Nof. 1983, kuna saabsan Canshuur Dhaafka Shirkadda Dayuuradaha Sacuudiga. » 848


### QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM

Wakaaladda M. Qaranka

MAXKAMADDA GOB. MUDUG, 12.10.83 Lumid Jeeg War. L. 275823 ku qoran Taliska Daraawiishta Booliska Xamar L. 601 » 849

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 24.12.83 Lumid Buug Keyd L. 1779/4 ku qoran Khaliif Kaahin Bulaale L. 602 » 850

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 24.12.83, Lumid Buug Keyd L. 3004 ku qoran Xulbada Caddow Salaad L. 603 » 851

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 24.12.83, Lumid Buug Keyd L. 2536 ku qoran Cumar Maxamuud Afrax L. 604 » 852

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 25.12.83, Lumid Buug Keyd L. 16400 ku qoran Cabdi Cabdulaahi Barkhadle L. 605 » 853

MAXKAMADDA GOBOLKA BAY 26.12.82, Lumid Jeeg War. L. 635699 ku qoran Cabdulxamiid Sheekh Cali L. 606 » 854

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 26.12.83, Lumid Buug Keyd L. 8378 ku qoran Cali Yuusuf Maalin L. 607 » 855

AGRICUL TURIAL INDUSTRIAL IYO TRADING CO LTD AIAT DHISMO SHIRKAD L. 608 » 856

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.11.83, Lumid Jeeg War. L. 707041 ku qoran Axmed Sheekh Cumar L. 610 » 858

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.12.83, Lumid Buug Kayd L. 1295/4 ku qoran Sheekh Xasan Maxamed L. 611 » 859

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.12.83,
Lumid Buug Kayd L. 3634 ku qoran » 860
Cali Saciid Maxamed L. 612

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.12.83,
Lumid Buug Kayd L. 2246 ku qoran » 861
Nuur Diinle Maxamed L. 613

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.12.83,
Lumid Buug Kayd L. 1827 ku qoran » 862
Cabdullaahi Caamir Muuse L. 614

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 11.12.83,
Lumid Buug Kayd L. 14230 ku qoran » 863
Cumar Cabdi Cali L. 615

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 12.12.83,
Lumid Jeeg War. L. 512075 ku qoran » 864
Shariif Mudan Nuur L. 616

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 12.12.83,
Lumid Buug Kayd L. 2448 ku qoran » 865
Aweys Maxamed Cabdi L. 617

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 13.12.83,
Lumid Buug Kayd L. 5994 ku qoran » 866
Maryan Macallin Maxamed L. 618

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 14.12.83,
Lumid Buug Kayd L. 887/83 ku qoran » 867
Cabdi Jimcaale Xuseen L. 619

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 14.12.83,
Lumid Buug Kayd L. 5614 ku qoran » 868
Aamina Yaasiin Baxnaan L. 620

MAXKAMADDA GOBOLKA BANNDIR,
10.12.83 Lumidi J. War. L. 671480 L. 621 » 869

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 9.10.83,
Lumid Jeeg War. L. 245376 ...

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 27.11.83,
Lumid Jeeg War. L. 693924 ku qoran » 871
Saleebaan Warsame Maxamuud L. 623

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 15.12.83,
Cumar Cabdi Cali L. 625 » 873
Lumid Buug Kayd L. 448 ku qoran

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 12.12.83,
Lumid Buug Kayd L. 2401 ku qoran » 874
Cabdi Barre Caalin L. 626

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 18.12.83,
Lumid Buug Kayd L. 16568 ku qoran » 875
Maxamed Axmed Cariif L. 627

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 18.12.83,
Lumid Buug Kayd L. 18696 ku qoran » 876
Maxamed Barre Cabdi L. 628

# QAYBTA KOWAAD
## SHARCI

SHARCI lambar 21, taariikh 10 Disembar 1983, Ciqaabta Dembiga Been Abuurka Lacagta Dalka iyo Warqadaha leh Qiimaha Lacageed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Iyadoo qodobbada 348 iyo kuwa ka dambeeya ee Xeerka Ciqaabta sidoodii u taagnaanayaan, qof kasta oo been abuur lacagta Dalka ama warqadaha leh qiimaha lacageed, ama soo geliya ama lagu helo isagoo soo gelinaya Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya lacag la been abuuray ama waraaqo leh qiimo lacageed, inkasta ha dhammaadeene, waxaa lagu ciqaabayaa:

1) 3 ilaa 4 sano oo xarig ah iyo ganaax gaaraya ilaa Sh. So. 50.000/= marka qiimaha qalabka dembiga lagu galay uu u dhexeeyo Sh. So. 1 ilaa Sh. So. 10.000/=.

2) 5 ilaa 10 sano oo xarig ah iyo ganaax gaaraya ilaa Sh. So. 100.000/= marka qalabka dembiga lagu galay uu qiimihiisu u dhexeeyo Sh. So. 10.001/= ilaa 100.000/=.

3) Dil marka qiimuhu ka badan yahay Shs. 100.000/=.

Qod. 2aad

Maxkamadda Badbaadada Dalka ayaa awood u leh qaadista dacwadaha la xiriira dembiyada qodobka sare ku tilmaaman.

Qod. 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood kadib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Disembar 1983

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER WASAARADDA MAALIYADDA L. 10 ee 6 Nof. 1983 Kuna Saabsan Canshuur Dhaafka Shirkadda Dayuuradaha Sacuudiga:—

WASIIRKA WASAARADDA MAALIYADDA

ASAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Coddeynta Canshuur Dhaafka Lr. 727 ee 3.4.1403h ee Wasaaradda Maaliyadda iyo Dhaqaalaha ee Boqortooyada Sacuudiga kaga deeyey Canshuuraha Dalka Sacuudiga hawlaha Shirkadda Dayuuradaha Soomaaliyeed.

ASAGOO ARKAY: Xeerka Canshuuraha Toosan iyo kuwa Dadban.

WUXUU GOOYEY

Qod. 1aad

Shirkadda Dayuuradaha Cacuudiga hawlaha ay Dal keenna ka fuliso waa ka daysan yihiin Canshuuraadka Dalka Soomaaliyeed.

Canshuur dhaafkaan wuxuu ka bilaabanayaa 1974, oo ah mudaddii Dawladda Boqortooyada Sacuudiga ay u fidisay Canshuur dhaaf hawlaha Shirkadda Dayuuradaha Soomaaliyeed ay ka fuliso Dalka Baqortooyada Sacuudiga.

Qod. 2aad

Xeerkaan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, waana in loo gudbiyaa Hantidhowrka Guud ee Dawladda si uu u diiwaan geliyo.

Waan Aragnay ee Diiwaangelinnay, Dii
waanka L. 1 BOG. L. 27,
Muqdisho, 10 Nof. 1983,

HANTI DHAWRAH GUUD
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

Muqdisho, 6 Nof. 1983

WASIIRKA MAALIYADDA

## MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Mudug ka dib.—

MARKUU ARKAY: Warqadda L-Ucfir 2.17-2.55-81 ee la qoray 20.6.83 kana soo baxday Taliska Ururka 4-cb ee Daraawiishta Gaalkacyo, laguna Caddeeyey. In uu Lumay Jeeg wareega Lam. 275833 ee la qoray 10.1-1982 kuna qorraa Taliska Daraawiishta Booliska Xamar, ay na ku jirtay lacag dhan Sh.So. 9.405 Shilin, Jeegaas oo laga bixiyey Bankiga Banacsiga iyo Keydka Soomaaliy eed laanta Gaalkacyo,

MARKUU ARKAY: Warqalda Taariikhleedu tahay 12.10.83 oo ka soo baxday Bankiga Ganausiga iyo Keyd ka Soomaaliyeed laanta Gaalkacyo, oo lagu caddeeyey In uu Jeegaasi jiray welina aan la soo caddeeyn in la qaatay.

MARKUU ARKAY: In uu jiray uuna Lumay Jega Lambarkiisu kor ku tilmaaman yahay,

### WUXUUNA AMRAYAA

Amrayaa in dib loo cusboonaysiiyo Jeegaas ka dib markii lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ay na ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah.

### WAXA KALE OO UU AMRAYAA

In Jeega cusub gacanta laga saaro Taliska Daraa wiishta Xamar ama cid Wakaalad ah ka sidata haddii aysan cid kale la sheegan mudadaas.

Gaakacyo, 13-10.1983

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. MUDUG
Sheekh Cabdulaahi Hilowle Cali

L. 601

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 1779/4 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 3aal kuna qoran lacag lhan Sh.So. 19.221 uu iska lahaa Khaliif Kaa hin Bulaale sida ku cal warqalla Lambarkeelu ya hay 00955 taariikhleelu 20.12.83 ee Bankiga Ganac siga iyo Keylka Soomaaliyeel laanta 3aad

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B. Kayd Lamb. 1779/4 oo ku qoran magaca Khaliif Kaahin Bulaale ay na ku jirto Sh.So. 19.221.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 3aad u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 24.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 602

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 3004 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 4aad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 2210 uu iska lahaa Xulbada Caddow Salaad sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 3004 taariikhdeedu 24.12.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta4aad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B. Kayd Lamo. 3004 oo ku qoran magaca Xulbada Caddow Salaad ay na ku jirto Sh.So 2210

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 4aad u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yaray 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J D S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 24.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 603

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 2536 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 4aad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 3.900 uu iska lahaa Cumar Maxa muud Afrax sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay ——— taariikhdeedu 20.12.82 ee Bankiga Ga naisiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 4aad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B. Kayd Lamb. 2536 oo ku qoran magaca Cumar Maxamuud Afrax ay na ku jirto Sh.So. 3.900

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 4aad u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 24.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 604

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 16400 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh So. 66.497 uu iska lahaa Cabdi Cabdulaahi Barkhadle sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 2760 taariikhdeedu 24.12.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta X.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B. Kayd Lamb. 16400 oo ku qoran magaca Cabdi Cabdulaahi Barkhadle ayna ku jirto Sh.So. 66.497

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilm aaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maa linta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga kenin

Muqdisho, 25.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 605

MAXKAMADDA GOBOLKA BAY EE BAYDHABO

UJEEDDO: Baafin Jeegga Wareega L. 635699.
KU: Garyaqaanka Guud Ee Dawladda Muqdisho

Maxkamadaan Waxaa Arji u soo qortay Jaalle Cabdulxamiid Sheekh Cali Sheekh Aadan, Soomaali ah Degan Baydhabo Xaafda Isha Laanta 3aad ee magaalada Baydhabo.

Wuxuuna Sheegay inuu ka lumay Jeega Wareega Taariikhdu markay ahayd 11.12.83 Jeegaas oo ay ku qoran tahay lacag dhan Sh.So. 30,000 Shilin Jeegaas oo Lam/su yahay 635699 taariikhdiisuna tahay 11.12.83 la gana sameeyey Bankiga Baydhabo, Isla taariikhdaas un lumay oo ah 11.12.83

Sidaas Awgeed waxaanu idinka codsanaynaa inaad ku Baafisaan Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Fiiro Gaar ah
Kharajkii waa laga cafiyey saboolnimo awgeed.

Baydhabo 26.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BAY
Bashiir M. Maadeey Cumar

L. 606

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 8378 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 3aad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 12.749 uu iska lahaa Cali Yuusuf Macallin sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 00970 taariikhdeedu 26.12.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeedlaanta 3aad

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B. Kayd Lamb. 8378 oo ku qoran magaca Cali Yuusuf Macallin ayna ku jirto Sh.So. 12.749

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 2aad u bedelo Buuga Keyd ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo waree gto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aa nka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Had dii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 26.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 607

Agricultural Industrial & Tradinc Co. Ltd Alat-
Sidhigga Muqdisho Raasumaalka Sh-So. 1.000.000

DHISMO SSIRKAD

Maalinta 30ka Nofember 1983, waxaa qoraal lamb. 2967 REB, oo qoray Notaayo Dr. Cabdi Muuse Mayow oo deggan Muqdisho, lagu dhisay Shirkad Saamiley ah lagu magacaabay Agricultural Industrial & Tradinc Co. Ltd. Alat oo Saldhiggeedu yahay Muqdisho, Raasumaal keeduna ah Sh-So. 1.000.000 Ujeeddadeeduna tahay in ay qabato howlaha beeraha, warshadaha iyo ganacsiga Guud hawlaha keenidda & Dhoofinta.

Qoraalka dhismada oo kor ku xusan waxaa lagu di waangeliyey Muqdisho 1da Diseember 1983 lamb. 1859 Atti pubb. Vol. 24 oo uu ansixiyey Garsooraha Maxka madda Gobolka Banaadir, maalinta 6.12.83 waxaana maalinta 8da Disember 1983 la dhigay xafiiska kaalinta Maxkamadda Gobolka Banaadir, waxaana lagu qoray lamb. 1876 Buugga isku xigidda iyo lamb. 1645 Buugga Shirkadaha.

Waxaa qoraalka Dhismaha lagu magacaabay Gud diga Maamulka Shirkadda oo ka kooban:—

— Yuusuf Nuur Xasan — Guddoomiye
— Bashiir Xaaji Muuse Cumar — Xubin

Waxaa isla qoraalka dhismaha awood buuxda lagu siiyey Guddiga maamulka in uu kordhin karo Raasum aalka Shirkadda ilaa Sh-So. 10 Malyuun, iyadoo la soo saari doono saamiyo cusub oo caadi ah, waxaana kor dhintaas samey doona hal mar, amaba dhowr mar, san nad gudihiisa, oo laga bilaabo taariikhda Shirkadda lagu qoro Buugga Shirkadaha.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 609

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J. War. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 517365 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Garoowe kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 17.000 uu iska lahaa Maxam ed Cusmaan sida ku cad warqadda lambarkeedu 20049 taariikhdu 29.12.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Garoowe.

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga Lamb. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 517365 oo ku qoran Maxamed Axmed Cusmaan ayna ku jirto Sh.So. 17.000.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Garoowe u bedelo Maxamed Axmed Cusmaan ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maal mood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmi ga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa aan wax is hor taag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 610

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J. War. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 707042 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta labaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50.000 uu iska lahaa J. Axmed Sheekh Cumar sida ku cad warqadda lambarkeedu 00360 taariikhlu 29.11.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta labaad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In labaabi'iyo (Ammortamento) J. War. lam. 707042 oo ku qoran Jaalle Axmed Sheekh Cumar ayna ku jirto Sh.So. 50.000.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta labaad u bedelo J. War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.11.83

GUDDOOMIYAHA MAXQAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 610/bis

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J. War. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 707041 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta labaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50·000 uu iska lahaa J. Axmed Sheekh Cumar sida ku cad warqadda lambarkeedu 003760 taariikhu 29·11·83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta labaad·

HADDUU ARKAY: Qod· 69 Sharciga Lam· 2 ee 9·9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega War. Lamb· 707041 oo ku qoran Jaalle Axmed Sheekh Cumar ayna ku jirto Sh.So. 50·000·

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta labaad u bedelo Jeega Wareega ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J·D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30·11·83

CUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB· BANAADIR
Dr· Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 610/bis

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. Keyd Dhumay oo lambarkiisu ahaa 1295.4 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 8.951 uu iska lahaa Jaalle Sheekh Xasan Maxamed sida ku cad warqadda lam. yahay 00920 taariikhdeedu 8.12.83 ee Bankiga Gana csiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Afraad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B. Keyd Lam. 1295.4 oo ku qoran magaca Sheekh Xasan Maxamed ayna ku jirto Sh.So. 8.955

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Afraad u bedelo Sheekh Xasan Maxamed Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafin ta Rasmiga ah ee J. D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 10.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXQAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 611

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. Keyd Dhumay oo lambarkiisu ahaa 3634 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Afraad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100 uu iska lahaa Jaalle Cali Sa ciid Maxamed sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 349 taariikhdeedu 8.12.83 ee Bankiga Ganac siga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Afraad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lamb. 3634 oo ku qoran magaca Cali Saciid Maxamed ayna ku jirto Sh.So. 100

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Afraad u bedelo Cali Saciid Maxamed Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yara yn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faa finta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 10.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXQAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 612

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. Keyd Dhumay oo lambarkiisu ahaa 2246 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Afraad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100 uu iska lahaa Jaalle Nuur Diinle Maxamed sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 350 taariikhdeedu 8.12.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Afraad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lamb. 2246 oo ku qoran magaca Nuur Diinle Maxamed ayna ku jirto Sh.So. 100.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Afraad u beddelo Nuur Diinle Maxamed Buuga Keydka ee kor tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan si hor taag laga keenin.

Muqdisho, 10.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXQAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 613

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. Keyd Dhumay oo lambarkiisu ahaa 1827 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Afraad kuna qoran lacag dhan Sh. So. 50.050 uu iska lahaa Cabdulaahi Caamir Muse oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Afraad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lamb. 1827 oo ku qoran Cabdulaahi Caamir Muuse ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 50.050.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Afraad u bedelo Cabdulaahi Caamir Muuse Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib mar kay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 10.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 614

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. Keyd Dhumay oo lambarkiisu ahaa 14230 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 21.000 uu iska lahaa Jaalle Cumar Cabdi Cali sida ku cad warqadda lambarkee du yahay 00928 taariikhdeedu 11.12.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Sad/d.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lamb. 14230 oo ku qoran magaca Cumar Cabdi Cali ayna ku jirto Sh.So. 21.000.

WUXUU FASAXAY

Ii Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad u beddelo Cumar Cabdi Cali Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hor taag laga keenin.

Muqdisho, 11.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 615

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. Keyd Dhumay oo lambarkiisu ahaa 2448 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wadajir kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 2.000 uu iska lahaa Jaalle Aweys Maxamed Cabdi sida ku cad warqadda lam barkeedu yahay ——— taariikhdeedu 12.12.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laan ta Wadajir.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lamb. 2448 oo ku qoran magaca Aweys Maxamed Cabdi ayna ku jirto Sh.So. 2.000

WUXUU FASAXAY

Ii Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wadajir u beddelo Aweys Maxamed Cabdi Buga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yara yn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faa finta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 12.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 617

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. Keyd Dhumay oo lambarkiisu ahaa 5994 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Kowaad kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 83.152,84 uu iska lahaa J/le Maryan Macallin Maxamed sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 25588 taariikhdeedu 12.12.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laan ta Kowaad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lamb. 5994 oo ku qoran magaca Maryan Macllin Maxamed ay na ku jirto Sh.So. 83.152.84.

WUXUU FASAXAY

Ii Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Kowaad u beddelo Maryan Macallin Maxamed Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 13.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 618

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. Keyd Dhumay oo lamarkiisu ahaa 887/83 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta labaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 15·000 uu iska lahaa J/le Cabdi Jimcaale Xuseen sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay —— taariikhdeedu 14.12·83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta labaad

WUXUU XEERIYEY:

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lamb. 887/83 oo ku qoran magaca Cabdi Jimcaale Xuseen ay na ku jirto Sh·So. 15·000.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta labaad u beddelo Cabdi Jimcaale Xuseen Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmoo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J·D·S. Haddii inta ka horaysa aan is hor taag laga keenin·

Muqdisho, 14.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB· BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 619

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. Keyd Dhumay oo lamarkiisu ahaa 5614 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Kowaad kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 170.366.07 uu iska lahaa J/le Aamina Yaasiin Baxnaan sida ku cad warqadda la mbarkeedu yahay 25569 taariikhdeedu ——— ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laan ta Kowaad.

WUXUU XEERIYEY.

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lamb. 5614 oo ku qoran magaca Aamina Yaasiin Baxnaan ay na ku jirto Sh.So. 170.366.70.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Kowaad u beddelo Aamina Yaasiin Baxnaan Buu ga Keyd ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hor taag laga keenin.

Muqdisho, 14.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 620

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGECSA

Ujeeddo: Cusboonaysiin Jega Waeega oo lambarkiisu yahay.—

1. J.W.Lr. 245376 Lacagtiisuna tahay 50,000 ee Sh. Taariikhdiisuna tahay 13.9.80kii. Lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Hargeysa, loona sameeyey Maxamed Jaamac Ismaaciil.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Maxamuud Jaamac Ismaaciil, kuna Codsanaayo in loo cusbooneysiiyo Jeega wareega ee ka lumay, ee lacagtiisa iyo lambarkiisuba sare ku xusan yahay:—

MARKUU ARKAY: Cadeynta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Hargeysa, kuna taariikhaysan 6.9.83 oo lagu cadeeyey in 13.9.80kii laga sameeyey Jeega War. ee sare ku qoran Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Hargeysa, loona sameeyey Maxamed Jaamac Ismaaciil, lacagtiisuna tahay sida sare ku qoran

MARKUU ARKAY: Qod 69—70 Xeerka lambarkiisu yahay 2 soo baxay 9.9.1965kii.

Wuxuu Go'aamiyey in la kansal gareeyo Jeegii Wareega ee lumay, loona cusbooneysiiyo J/le Maxamed Jaamac Ismaaciil, oo Jeeg si lacagtiisa iska leh, cusbooneysiintana gacanta laga saaro Jaalle Maxamed Jaamac Ismaaciil 15 maalmood ka lib maalinta Go'aankan laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Waxaa la farayaa Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Hargeysa, inuu ku lhejiyo Nuqulka Io'aanka Bankiga Iridiisa si ciddii haysatay Jeegii lumay ee kor lagu kansal gareeyey ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.—

Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka Hargeysa.
(MaxamuudJaamac Cigaal)

Garsooraha Max. Gobolka W/Galbeed Hargeysa

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGECSA

27.11.83

Ujeeddo: Cusboonaysiin Jega Waeega oo lambarkiisu yahay siddan:—

1. J.W.Lr. 693924 lacagtiisuna dhan tahay 30,000 sh. taariikhdiisuna tahay 26.9.83 lagana sameeyey Bankiga Banacsiga iyo Keydka laanta Burco, kuna qoran iskana leeyahay Saleebaan Warsame Maxamuud.

MARKUU ARKAY: Arjiga ku taariikhaysan 27.1.83uuna soo qortay J. Sal baan Warsame Maxamuud, kuna codsanaayo in loo cusbooneysiiyo Jeega War. ee ka lumay ee lacagtiisa iyo lambarkiisuba sare ku xusan yahay.

MADDUU ARKAY: Cddeynta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, laanta Hargeysa kuna taarii khayan 15.11.83 lagu cadeeyey in26.9.83 laga sameeyey Jeega Wareega ee sare ku qoran Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Burco. Loona sameeyey Sa leebaan Warsame Maxamuud, lacagtiisuna tahay sidda sare ku qoran:—

MARKUU ARKAY: Qod/ 69—70 Xeerka lambarkii su yahay 2 soona baxay 9.9.1965kii.

Guxuu Go'aamiyey in la kansal Gareeyo Jeegu lu may, loona cusboonaysiiyo J/le Saleebaan Warsame Ma xamuud, oo lacagta Jeegaas ku qoran iska leh, cusboo naysiintana Gacanta laga saaro J/le Saleebaan Warsa me Maxamuud 15 Cisho ka dib maalinta Go'aanka laga soo saaro Faafintu Rasmiga ah ee J.D.S.

Waxaa la farayaa Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Burcoinuu ku dhejiyo Nuqulka Go' aanka Bankiga Iridiisa si ciddii haysata Jeegii lumay ee kor lagu kansal Gareeyey ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka Hargeysa
(Maxamuud Jaamac Cigaal)

Garsooraha Maxkamadda Gobolka W.G Hargeysa

# MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. Keyd Dhumay oo lamarkiisu ahaa 448 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wardhiigley kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 20.000 uu iska lahaa Cumar Cabdi Cali sida ku cad warqadda lambarkeedu ya hay 138 taariikhdeedu 15-12-83 ee Bankiga Ganacsi ga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wardhiigley.

WUXUU XEERIYEY:

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lamb. 448 oo ku qoran magaca Cumar Cabdi Cali ayna ku jirto Sh.So 20-000

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wardhiigley u bedelo Buuga Keyd ee kor ku til maaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maa linta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J-D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin

Muqdisho, 15-12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB- BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 625

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. Keyd Dhumay oo lamarkiisu ahaa 2401 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Kowaad kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 15.468,51/8 uu iska lahaa J. Cabdi Barre Caalin sida ku cad warqadda lambark eedu yahay 25590 taariikhdeedu 12.12.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeedlaanta Kowaad

WUXUU XEERIYEY:

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lamb. 2401 oo ku qoran magaca Cabdi Barre Caalin ayna ku jirto Sh.So. 15.468,51.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Kowaad u bedelo Cabdi Barre Caalin Buuga Key dka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ku dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hor taag laga keenin.

Muqdisho, 12.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 626

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. Keyd Dhumay oo lamarkiisu ahaa 18696 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 2.776 uu iska lahaa Maxamed Barre Cabdi sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 2727 taariikhdeedu 18.12.83 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta.

WUXUU XEERIYEY:

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lamb. 18696 oo ku qoran magaca Maxamuud Barre Cabdi ayna ku jirto Sh.So. 2.776

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta u beddelo Buuga Keydka, ee kor ku til maaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin

Mudisho, 18.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 628

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J. War. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 671480 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Afraad kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 50.000 uu iska lahaa J. Abshir Xirsi Geeddi sida ku cad warqadda lambarkeedu 347 taariikhdu 8.12.83 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Afraad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. War. Lr. 671480 oo ku qoran J/le Abshi Xersi Geeddi ayna ku jirto Sh.So. 50.000.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Afraad u bedelo Jeega War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo waree gato muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aa nka lagu daabaco Faafinta aRsmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 549